

Dadaal lagu doonaayo kordhinta badqabka ardayda intay lagu jiro bilaha jiilaalka, Denver Public Schools waxay doonaysa inay ku xasuusiso Xeerka uga Dagsan Dib Udhaca dhanka Cimilada ee sanad dugsiyeedka 2019-20. **Ayadoo ku cusub sanad dugsiyeedkaan, dhamaan dugsiyada (ayadoon laga fiirin xiligay bilaabmaan) waxaa ladaahinayaa labo saacadood hadii Dib Udhac dhanka Cimilada ah ay kudhawaaqdo Degmadu.**

Ujeedada Jadwalka Dib udhaca dhan Cimiladu waa in basaska dugsiyada lasiiyo waqti dheeri ah oo ay kusoo qaadaan ardayda laguna yareeyo waqtiga bas sugida ee ardayda kunool aaga cimiladu daran tahay. Go'aanka ah in la xiro ama dib loo dhiciyo dugsiyada waxaa qaban doona Kormeeraha Guud ee ku saleysan macluumaadka ay bixiyeen wakiilada Adeegyada Gaadiidka DPS, hay'adaha gaadiidka iyo xafiiska cimilada.



Hadii DPS kudhawaaqdo Dib Udhac dhanka Cimilada ah:

- Basaska iskuulada subaxdii ayaa ku shaqayn doono jadwalka dib udhaca oo bilaabi doona inay ka qaadaan meelaha baska istaago labao saacadood ka dib waqtiga caadiga ah ee soo-qaadista. (Tusaale: Hadii waqtiga caadiga ah ee baska subixii uu ardayda qaado uu yahay 7:55 a.m., baskaaga ayaa ku sooqaadaaya markay saacadu tahay 9:55 a.m.)
- Ardayda lugaysa, baaskiilka raacaysa, kabaha taayirada leh kusocda ama raacaaya RTD waxaa lagula talinayaa inay guriga kasoo baxaan labo saacadood kadib xiligii ay qaadiyan dugsiyada kubixi jireen. (Tusaale: Hadii ardaygu guriga kabaxo markay saacadu tahay 7:45 a.m. si uu dugsiyada u aado, wuxuu ardaygu baxayaa 9:45 a.m. si uu dugsiyada uyimaado waqtigii larabay)
- ECE iyo xanaanada caruurta: Dugsiyada Barbaarinta ee Subixii (AM) waa lajoojinayaa. Ardayda dugsiyada xannaanadda (PM) way tagi doonaan dugsiyada waxayna leeyihiin adeega bas jadwalkooda caadiga ah.
- Quraacda ayaa weli la siin doonaa ardayda marka ay imaadaan dugsiyada.



Hadii dugsiyada DPS sii furnaadaan inta lagu jiro cimilada daran:

- Degmada ayaa lasoconaysa cimilada maalintii oo dhan si loo hubiyo bad qabka ardayga.
- Gaadiidka loo baahan yahay ayaa labixin doonaa. Hase yeeshee, adeegyada waxbaa laga badali karaa si loo hubiyo bad abka darawalka baska iyo ardayga.
- Xaaladaha wadooyinka ayaa ka dooni kara ardayda inay waqti dheeri ah galiyaanwadada ay dugsiyada, adeegyada gaarka ah, barnaamijyada ama guriga umarayaan.
- Hadii cimilo daran bilaabato inta lagu jiro maalinta dugsiyada, go'aan ayaa lagaari karaa si ardayda xili hore loo fasaxo.
- Marinada basku waxay ahaan doonaan isla kuwii caadiga ah ee galabtii lamari jiray. Ayadoo kuxiran xaalada jirta, waqtiyada guriga la ilaamaayo ayaa kala duwanaan kara.
- Kadib marka hawla dugsiyada dhammaadaan (munaasabadaha ciyaaraha, barnaamijyada kobcinta, iwm.) ayaa wax laga badali karaa ama lajoojin karaa sabab laxariirta xaaladaha cimilada.



Hadii dugsiyada DPS la xiro sabab laxariirta cimilo aad uxun:

- Waaxda gaadiidku masoo bixinayso wax basas ah.
- Dhamaan halaha dugsiyada kadib, ayna kujiraan ciyaaraha dugsiyada dhexe iyo dugsiyada sare, aa lajojinayaa mana jiri doono gaadiid ardayda uqaadi doona nashaadaadkaan.
- Fadlan samayso qorshayasha muhiimka ah ee daryeelka ardaygaaga marka lajoojiyo aadista dugsiyada.



Sida wargalinta lagugusoo gaarsiinaayo:

Markay dhacdo cimilo xun, saraakiisha degmada ayaa gaaraaya go'aan markay tahay 5 a.m. Hadii go'aanka la gaaro noqdo in la xiro ama dib loo dhigo waqtiga imaanshaha dugsiyada, taleefishinta iyo raadiyaasha maxaliga ah ayaa si degde ah loo wargalinayaa waxaana lashaacinayaa wargalinada caadiga ah ee xiritaanada ama dib udhacyada dugsiyada. Waxaad sidoo kale booqan kartaa thedenverchannel.com, 9News.com, kdvr.com iyo denver.cbslocal.com. Wargalinta Isbaanishka waxaa lagu sameyn doonaa wargeysyada raadiyaha 1150-AM, 1280-AM iyo 1090-AM.

Robo Call - IHadii lagu dhawaaqo Dib udhac Cimilo iyo Xiritaanka Dugsiyada, Qoysaska waxaa laso gaarsiinayaa ogeysiiska Robo Call oo kuwargalinayaa talaabooyinka xigga ee laqaadaayo. Waa muhiim in qoysasku ay lahaadaan macluumaadka lagala xariiraayo oo kii ugu danbeeyay ah oo yaala xafiiska hore ee dugsiyada ama Xarunta Infinite.

Weather.dpsk12.org - Xiritaanada Dedgega ah ee ugsiga iyo Dib Udhacyada Cimilada axaa lagusoo daabacayaa barta transportation.dpsk12.org.

Baraha Bulshada - Wargalinada laxariirta xiritaanka ama dib udhaca dugsiyada waxaa lagusoo qorayaa barta [Facebook.com/DenverPublicSchools](https://www.facebook.com/DenverPublicSchools), iyo sidoo kale [@DPSnewsnow](https://twitter.com/DPSnewsnow) iyo [@DPSschoolbus](https://twitter.com/DPSschoolbus) ee aalada Twitter.

Laymanka Tooska ah - Fariin iclaaminaysa xiritaanka ama dib udhaca dugsiyada ayaa lagu reebayaa laynka xiritaanka ee DPS oo ah 720-423-3200, iyo sidoo kale Laynka Adeegyada Gaadiidka ee DPS oo ah 720-423-4600.